

Maamulka Caafimaadka Oregon wuxuu rabaa in uu war kaa maqlo!

 **Waa maxay noocyada adeegyada caafimaad
ee muhiimka u ah dhammaan dadka
ku nool Oregon in ay noqdaan kuwo caafimaad qaba?** 

Maamulka Caafimaadka Oregon ayaa dib u eega heshiisyada ganaci ee ku lugta leh shirkadaha daryeelka caafimaadka ee ka jira Oregon. Dib eegistani waxay gacan ka geysataa xaqijinta in heshiisyadani ay caawin doonaan – oo aysan dhibaatayn – dadka ku nool Oregon. Gaar ahaan, OHA waxay eegtaa sida heshiisku u saameeyo sinnaanta caafimaadka, kharashyada macaamiisha, helitaanka iyo daryeelka.

**Fadlan nagala soo qayb qal kulanka bulshada ee dhanka internet-ka ah ee
dhacaya Isniinta Luulyo 25 laga bilaabo 4 galabnimo - 7 galabnimo oo dadka la
wadaag waxa ay yihiin noocyada adeegyada caafimaad ee muhiimka kuu ah**

Waxaanu ka hadli doonaa noocyada kala duwan ee adeegyada daryeelka caafimaad, oo ay ku jiraan:

- Daryeelka aasaasiga ah
- Qallinka
- Booqashooyinka waaxda xaalada degdega ah
- Adeegyada la xiriira xaaladaha caafimaad ee soo jireenka ah sida neefta, sonkorowga, iyo waxyaabo badan
- Adeegyada uurka la xiriira
- Adeegyada ka hortagga cudurka sida baaritaannada
- Adeegyada dadka ka caawiya in ay qorsheeyaan nidaamka daryeelka caafimaad sida isku duwida daryeelka

Maclumaadkani wuxuu gacan ka geysan doonaa qeexida kuwa ay yihiin heshiisyada ganaci ee ay OHA tahay in ay dib u eegto.

**Isniin
Luulyo 25
4 galabnimo – 7
galabnimo**

**Wixii maclumaad dheeraad
ah nagala soo xiriir
hcmo.info@dhsoha.state.or.us
503-385-5948**

Waxaa martigeliyay Maamulka Caafimaadka Oregon
<https://go.usa.gov/xJmsp>